# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12aad, Fadhigii 21aad

**21 September 2025**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Ajandaha Fadhiga:-** Warbixinta Xisaab Xidhkii Sannadka 2023kii ee Hantidhawrha Guud ee Qaranka

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal, Kooramku wuu inoo dhanyahay, ajandaha maanta laba arrimood baynu ka hadlaynaa, mid waa xisaab xidhkii 2023kii oo hanridhawraha Guud ka warbixinayo, midna waa doodda wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Maamulka Maaliyada oo aynu maanta bilaabayno, marka waxaynu ku horaynaynaa warbixinta hantidhawraha guud ee xisaab xidhka 2023kii, mudane hantidhawre guud ku soo dhawow.

**Md. Muuse Yuusuf Cismaan (Idigaa) Hanti dhawraha Guud ee Qaranka**: - Bismilaahi Raxmaani Raxiim Shirgudoonka, xubnaha Gollaha wakiilada, shqaalaha Hanti dhawrka, saxaafada iyo lataliyaasha Gollaha Salaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaato.

Waxaan idinka mahad celinayaa manta in aad idinku martiqaadeen in aan Gollaha hor imaado oo keeno xisaab-xidhkii 2023 sida aan kula wareegay xilka dhamaadkii Bishii june, xisaab-xidhkan manta ina horyaala Maanta nuqulkiisa waxaa Gollaha la keenay 2024 waxaase idinka dhignaa Buugaagta, waxayna daabacnaayeen muddo sanad ka badan iyaga oo daabacan oo yaala ayaan immi, oo aan xilka la wareegay oo Buugaag aan anigu daabacay ma aha waxaan filayaa in aad xisaab-xidhka aad hore u aragteen oo aad daristeen, waxaase meesha ka maqnayd hadii uu Hanti dhawrihii iga horeeyay soo wereejiyay xisaab-xidhkan in ay Goluhu uyeedhaan oo ay Ajandaha ku daraan oo ka gudoomaan daabacaada buugaagta oo ay dersaan wixiii suaalo ah ee ay qabaan ee ka soo baxana ay wax ka weydiiyaan.

Buugaagtu waxay xanbaarsan tahay xog xisaabeed aad ubadan oo ubaahan Daraasad iyo waqti dheerad ah u baahan oo aanan halkan idiinku wada akhriyi kareen sida caadiga in Gollaha loo qaybiyo oo ay akhristaan wixii ay suaalo ka qabaana ay soo gudbiyaan oo ay Ansixiyaan.

Waxaan anigu soo gaadhay oo aan xilka la wareegay isaga oo dhamays tiran oo ay wax yari ay ka dhiman yihiin, isku dabaridkii xisaab-xidhkii 2024 oo aynu u balansanahay

maalinta salaasada in aan keeno haduu alle ka dhigo, shaqada iyo waxqabadkuba ay iga horeeyeen aniga haday noqoto shaqadii iyo baadhistii iyo isku dabaridkii xisaabtu ay labada sanadoodba ay iga horeeyeen waxaan jeclaan lahaa in aan mid ka mid ah shaqaalahayga aan kalmad siiyo, oo faah-faahinaysa xisaabtan manta ina hortaala iyo sidii iskudabaridkeeda laysugu soo uruuriyay.

**Mr. Cali: Hawl-wadeenada Hantidhawrka Guud: -** Mudanayaal waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabara kaatu, hadaan u gudbo Nuxurka Buug sanadeedka xisaab xidhka 2023 ka si koobana aan uga hadalno isaga oo soo maray marxalado aad ufara badan, waa Buug xanbaarsan ujeedooyin xisaabeed oo aad xogteedu u wayn tahay.

Waxa muhiim ah oo idn horyaala Buugaagta laga soo diyaariyay xisaab-xidhka miisaaniyadan 2023 ee Qaranka JSL, waxa uu ka kooban yahay Buuganu ujeedada war bixinta oo uu Nuxurkeedu yahay in lagu faah-faahiyo mabaadiida iyo qawaaniinta loo raacay samaynta buugan.

Waxa kale oo ku jira masuuliyada ka saaran xisaabiyaha guud, waxa kale oo uu buugani xanbaarsan yahay Cutubyadiisu masuuliyada Hanti dhawrka guud ee Qaranka iyo xilka ka saaran diyaarinta miisaaniyada ee xisaabaadka Qaranka iyo waajibaadka saaran.

Waxa kale oo uu buugani soo koobayaa Aragtida aanu ka bixinay xisaab-xidhkii miisaaniyada Qaran ee 2023.

Waxa Buugan ku jira oo isna ka mid ah fulinta miisaaniyadii la Ansixiyay ee uu Golluhu sii daayay sanadkaa, habkii ay soo martay, jarajartii ay soo martay, iyo nidaamkii maxaa ka badalmay, maxaa waafaqay, habkee ayay udhacdey miisaaniyadii Gollahan ka tagtey.

Waxa kale oo aan Buugan ka diyaarinay habraaca warbixinta maaliyada, maloo diyaariyay qaabkii ay qawaaniintu usoo dhigaysay, iyo shuruucdii loogu talo galay maku qotaamaa buugani inuu ku fadhiyo ujeedooyinkii runta ahayd ee xisaab-xidhka, maka turjumayaa xisaab xidhkan aanu soo diyaarinay mid leh faham ay mudanayaashu, ay ku gartaan wixii ay Ansixiyeen iyo habkii loo maamulay siduu ahaa ayaan ku soo ban dhignay.

Waxa kale oo ku jirta buugan oo ku diyaarsan dheelitira kharashka iyo Dakhliga, mudadaa sanadka ah ee 2023 maxaa Dakhli ina soo galay maxaa aynu kharash garaynay, maxaa miisaaniyadii odoroska ahayd maxaa tashiil lagu sameeyay.

Waxaa kale oo buuga ku dhamays tiran in aanu ka warano xisaabaadka Qaranka oo u qaybsama labo qaybood, xisaabta layidhaahdo miisaaniyada caadiga ah, iyo miisaaniyada ka baxsan kharashka iyo Dakhliga caadiga ah.

Waa maxay ama looga jeedaa miisaaniyada ka baxsan kharashka iyo Dakhliga, maxayse kukala duwan yihiin miisaaniyada caadiga ah, iyo kharashka iyo Dakhliga miisaaniyada ka baxsan?

Waxay dawladu qabtaa Dakhli aan loo isticmaalin, Dawlada dhexe oo kaliya waxaa ka mid ah wadada Ceerigaabo, waxaa ka mid ah 10% sadka loo qabto Dawladaha Hoose lacagahaas oo dhan waxaa layidhaahdaa kharashaadka ka baxsan miisaaniyada macne ahaan Dawladu Dakhli ahaan ayay uqabataa laakiin marka danbe waxay ku dhacdaa xisaab gaar ah oo loogu talagalay in la siiyo cidii lahayd.

Waxaa ku diyaarsan oo ku dhamays tiran buugan hay`ado ay tiradoodu dhan tahay 108 inustuion ayuu buugani turjumayaa miisaaniyadooda, waxa ay kala yihiin Dawlada dhexe oo ah 59 hay`adood, wasaarado, ciidamo, madaxtooyo, Gollayaal, waxaa ka mid ah 42 degmo oo dawlad hoose oo uu dalku leeyahay xisaab xidhkoodii oo uu buugani koobayo, waxaa ka mid ah 7 Hay`adood oo ah hay`adaha macaashka sameeya isugaynta wadarta guud ee buugani ka turjumayo xisaab-xidhka aanu ka soo samaynay waxa uu dhan yahay 108 hay`adood oo dhamaantood leh faah-faahintii Dakhligooda, odoroskooda maxaa dhab u yimi, maxaa kharash baxay.

Aad baad u mahadsan tihiin, waxaanu diyaar u nahay marka aad fahmtaan, akhridaan inaanu wixii su'aal ah ee aad qabtaan idinka jawaabno. WSC.

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal, wixii su'aalo ah markaynu soo akhrino ayaynu u yeedhan doona si wixii su'aalo ah loo waydiiyo, maanta sidaas ayaynu hantdhawraha guud ku fasaxaynaa, fadhigiina wuxuu inoo xidhan yahay. Waa inoo fadhiga barrito 09:30 AM 22 September 2025.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada**
**-----------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**
**-------------------------------------**